**MACLUUMAADKA DHIBBANAHA** *ee kaddib marka la soo saaro Amarka RFA ga ah:*

Maxkamaddu waxa ay soo saartay Amar Kama Dambays ah oo loogu talagalay in uu kaa ilaaliyo xadgudubka. **Eedaysanaha waxa lagu soo oogi karaa faldambiyeed maxkamadda dembiyada gudaheeda haddii Eedaysanuhu jabiyo amarka.**

Inkasta oo amar kama dambeys ah lasoo saaray, haddana looyar ka socda hay'addaada xadgudubka guriga ee maxalliga ah ayaa weli lala xidhiidhi karaa. Wixii macluumaad ah ee la xidhiidha cida kuu olalaynaysa ee aagaaga booqo websaytkan https://vtnetwork.org/get-help/

**ADEEGGA.** Caadi ahaan, Eedaysanaha waxa gacanta laga siinayaa nuqul Amarka Kama Dambaysta ah kahor inta aanu/aanay ka bixin maxkamadda. Haddii eedaysanuhu aanu joogin halkaas ama aanay taasi dhicin, masuuliyadda maxkamadda waa inay amarto fulinta sharciga inay u geeyaan Eedaysanaha. Haddii aan Eedaysanaha si shakhsi ah aan loogu gaynin, Amarku ma noqon doono mid la fulin karo, ammaankaaguna waxa uu ku jiri karaa khatar.

**FULINTA.** Dhammaan amarradu waxa ay ka mamnuucayaan Eedaysanaha in uu kugu xadgudbo adiga iyo/ama carruurtaada. Iyada oo ku xidhan waxa uu amarkaagu leeyahay, Eedaysanaha waxa dhici karta inaan loo ogolaan in uu kula soo xidhiidho ama uu kaa soo ag dhawaado adiga, gurigaaga, shaqadaada, dugsigaaga ama gaadhigaaga. Waa inaad si dhakhso ah ugu wargelisaa wixii jabin ah ee Amarka ah bilayska. WAXA AY KAA CAAWIN DOONAAN FULINTA AMARKAAGA. Hayso nuqul. Waxa aad ka heli kartaa dheeraadyo maxkamadda.

**KOOBSASHADA.** Dhammaan saraakiisha fulintu waxa ay hubin karaan liis qaranka oo dhan ah si ay u eegaan in Amarkaagu uu dhaqan galay iyo waxa ay shuruuddiisu yihiin. Amarkaagu waa mid laga fulin karo dhammaan gobolka iyo wadanka oo dhan.

**FAHMIDDA AMARKAAGA.** Waxa aad u baahan tahay inaad akhrido Amarkaaga oo aad fahanto. Amarku waxa uu KELIYA KA DHAN YAHAY EEDAYSANAHA. Tan macneheedu waxa weeyi in Keliya Eedaysanuhu uu jabin karo Amarka oo dabadeed lagu xidhi karo. Waa inaanad ku dhiirrigelin in uu kula soo xidhiidho Eedaysanuhu haddii isaga ama iyada la amray inaanay/inaanu kula soo xidhiidhin. Wixii kiis faldambiyeed ah ee ka dhan ah Eedaysanaha waa ka gaar kiiskan RFA ga ah. Amarkan Maxkamadda Qoysku beddeli maayo wixii ah shuruudaha sii daynta ama shuruudaha kormeerka ah ee maxkamadda faldambiyeedka ee ka dhan ah Eedaysanaha. Isbeddelka lagu sameeyo ama haddii faraha laga qaado Amarkan RFA ga ah beddeli mayso shuruudaha sii daynta ama shuruudaha kormeerka ee Eedaysanaha.

**ISBEDDELADA LAGU SAMEEYO AMARKA.** KELIYA MAXKAMADDA AYAA BEDDELI KARTA AMA FARAHA KA QAADI KARTA AMARKA. Amarka ma beddeli kartid adiga, Eedaysanaha ama heshiis ay gaadhaan labada dhinac. Keliya waxa la beddeli karaa kadib marka maxkamadda loo soo xareeyo codsi qoraal ah oo uu Qaaddiguna go'aan kasoo saaro. Qaaddigu waxa uu dalban karaa dhegaysi kahor inta aanu wax isbeddelo ah ku sameyn amar jiray.

**XIDHIIDHKA.** Haddii aad u baahan tahay inaad la xidhiidho Eedaysanaha oo isaga ama iyada aan loo ogolayn inuu/inay kula soo xidhiidho adiga, Qaadigu waxa uu beddeli karaa Amarka kahor intaan Eedaysanuhu kula soo xidhiidhin.

**AGABYADA QOFKU LEEYAHAY EE SHAKHSIYEED.** Amarkaagu waxa uu kuu ogolaan karaa adiga ama Eedaysanaha inaad kasoo qaadato agabyada aad leedahay ee shakhsiyeed guriga. Taasi waa inay u dhacdo keliya sida uu Amarku ogol yahay. Wac bilayska maxalliga ah si aad u hesho caawimo.
Waxa dhici karta inaad ku qasbanaato inaad bixiso kharashka adeeggan.

**DHICITAANKA.** Fadlan fiiro gaar ah u yeelo taariikhda uu ku eeg yahay Amarkaagu ee ku qoran bogga u dambeeya. Haddii aad doonayso inaad kordhiso Amarka oo aad ka dhigto wakhti ka dambeeya taariikhda uu ku eeg yahay, waa inaad Maxkamadda u xarayso codsi qoraal ah. Hubso inaad xarayso dhawr toddobaad kahor inta aan amarku dhammaan.

**CARRUURTA.** Si ay maxkamaddu si sax ah oo dhamaystiran wax uga qabato baahiyaha muddada dheer ee carruurta, waxa aad u baahan doontaa inaad xarayso kiis ah Waalidnimo, Furniin, Kala Tag, ama Kala Kaxayn Madani. Wixii shuruudo ah ee korinta ama booqashada ah ee Amarkan RFA gu waxa uu dhammaan doonaa marka uu Amarku dhammaado.

**HANTIDA.** Si aad u hesho amarro kama dambeys ah oo ku saabsan xuquuqda ama lahaanshiyaha, waxa aad u baahan doontaa inaad xarayso kiis ah Furniin, Kala Tag, ama Kala Kaxeyn haddii aad xaas leedahay ama aad leedahay lamaane aad wada degan tihiin. Haddii aanad xaas lahayn ama aad leedahay lamaane aad wada nooshihiin, si aad u hesho amar kama dambeys ah oo ku saabsan lahaanshaha hantida, waxa aad u baahan doontaa inaad ka xarayso kiis ah cabashooyinka yaryar ama ah madani Maxkamadda Sare.

**FOOMAMKA.** Ka dalbo shaqaalaha maxkamadda foomamka, ama waxa aad tagtaa www.vermontjudiciary.org.

**MACLUUMAADKA EEDAYSANAHA** *ee kaddib marka la soo saaro Amarka RFA ga ah:*

Maxkamaddu waxa ay soo saartay Amar Gurmadka Xadgudubka ah oo Kama Dambays ah. **WAXA LAGUGU SOO OOGI KARAA FALDAMBIYEED MAXKAMADDA FALDAMBIYEEDKA DHEXDEEDA HADDII AAD JABISO AMARKAN.**

**FAHMIDDA AMARKAAGA.** Waxa aad u baahan tahay inaad akhrido Amarka oo aad si sax ah u fahanto waxa uu leeyahay si aanad u jabin. Haddii aanad fahmin, waxa aad dooni kartaa inaad hesho caawimo sharciyeed. Hayso nuqul. Waxa aad ka heli kartaa dheeraadyo Maxkamadda.

**FULINTA.** Amarku KELIYA ADIGA AYUU KU KHUSEEYAA. Keliya adiga ayaa jabin kara. Haddii aad jabiso, waa lagu xidhi karaa. AMARKA WAXA FULIN DOONA BILAYSKA.

**WAXA AY TAHAY INAAD SAMAYSO.** Haddii lagu amray inaad ka fogaato masaafad cayiman Dhibbanaha oo aad si kadis ah meel caam ah kula kulanto, waa inaad ka gudubto wadada, ka baxdo tukaanka ama keliya ka fogaato xaaladda si dhakhso ah. Haddii Amarku aanu ogolayn xidhiidh taleefan oo uu Dhibbanuhu ku soo waco, ku jar taleefanka.

**ISBEDDELADA LAGU SAMEEYO AMARKA.** KELIYA MAXKAMADDA AYAA BEDDELI KARTA AMA FARAHA KA QAADI KARTA AMARKA. Amarka ma beddeli karo Dhibbanaha, adiga, ama heshiis ay gaadhaan labada dhinac. Keliya waxa la beddeli karaa kadib marka Maxkamadda loo soo xareeyo codsi qoraal ah oo uu Qaaddiguna go'aan kasoo saaro. Qaaddigu waxa uu dalban karaa dhegaysi kahor inta aanu wax isbeddelo ah ku sameyn Amar jiray.

**KOOBSASHADA.** Dhammaan saraakiisha fulintu waxa ay hubin karaan liis qaranka oo dhan ah si ay u eegaan in Amarkaagu uu dhaqan galay iyo waxa ay shuruuddihiisu yihiin. Amarkaagu waa mid laga fulin karo dhammaan gobolka iyo wadanka oo dhan.

**AMARRADA FALDAMBIYEED.** Wixii kiis faldambiyeed ah ee ka dhan adiga waa ka gaar kiiskan RFA ga ah. Amarkan Maxkamadda Qoysku beddeli maayo wixii ah shuruudaha sii daynta ama shuruudaha kormeerka ah ee maxkamadda (faldambiyeedka) Degmada. Isbeddelka lagu sameeyo Amarkan RFA ga ah, ama in faraha laga qaadaa, beddeli mayso shuruudahaaga sii daynta ama shuruudaha kormeerka.

**QORYAHA.** Haddii aad iibsato ama aad haysato qoryo ama rasaas, waxa lagugu soo oogi karaa faldembiyeed federaal. Haddii aad ka qabto wax su'aalo ah tan, waxa aad doonan kartaa inaad hesho caawimo sharciyeed.

**SOOGALEETINIMADA.** Haddii aanad ahayn muwaadin Maraykan ah, Amarku waxa uu saameyn karaa xaqa aad u leedahay inaad joogto wadanka. Haddii aad tahay muwaadin, waxa uu saamayn karaa xaqa aad u leedahay inaad u socdaasho wadanka dibaddiisa. Waxa aad doonan kartaa inaad hesho caawimo sharciyeed.

**AGABYADA QOFKU LEEYAHAY EE SHAKHSIYEED.** Amarkaagu waxa uu kuu ogolaan karaa adiga inaad kasoo qaadato agabyada aad leedahay ee shakhsiyeed guriga. Taasi waa inay u dhacdo keliya qaabka taas oo uu Amarku ogol yahay. Wac bilayska maxalliga ah si aad u hesho caawimo. Waxa dhici karta inaad ku qasbanaato inaad bixiso kharashka adeeggan.

**DHICITAANKA.** Amarkani waxa uu ahaanayaa mid dhaqan gal ah illaa la gaadho taariikhda uu ku eeg yahay ee ku qoran bogga u dambeeya, waxana loo fulin doona sida ku qoran illaa wakhtigaas la gaadhayo.

**CARRUURTA.** Si ay Maxkamaddu si sax ah oo dhamaystiran wax uga qabato baahiyaha muddada dheer ee carruurta, waxa aad u baahan doontaa inaad xarayso kiis ah Waalidnimo, Furniin, Kala Tag, ama Kala Kaxayn Madani. Wixii shuruudo ah ee korinta ama booqashada ah ee Amarkan RFA gu waxa uu dhammaan doonaa marka uu Amarku dhammaado.

**HANTIDA.** Si aad u hesho amarro kama dambeys ah oo ku saabsan xuquuqda ama lahaanshiyaha, waxa aad u baahan doontaa inaad xarayso kiis ah furniin, kala tag ama kala kaxeyn haddii aad xaas leedahay ama aad leedahay lamaane aad wada nooshihiin. Haddii aanad xaas lahayn ama aad leedahay lamaane aad wada nooshihiin, si aad u hesho amar kama dambeys ah oo ku saabsan lahaanshaha hantida, waxa aad u baahan doontaa inaad ka xarayso kiis ah cabashooyinka yaryar ama ah madani Maxkamadda Sare.

**FOOMAMKA.** Ka dalbo shaqaalaha maxkamadda foomamka, ama waxa aad tagtaa www.vermontjudiciary.org.